

Ururinta afar iyo labaatanka saacadood (24 sac) ee kaadida


WAXYAALAHAN AYAA U BAAHAN TAHAY

Weelka loogu talagalay in kaadida lagu shubo oo daryeel-caafimaadeedka ku siiyay iyo weel aan lagu isticmaalin, sida bakeeri ama koob blaastik ka sameeysan.
Ururinta kaadida kahor haddii aad musqusha ku kaadiso, waa inaad ururinta kaadida koow ka soo bilaawda.

SIDATAN YEEL



Ururinta kaadida **kahor** ku soo kaadi musqusha kaddib qor saacadda.



Marka ku xigta oo aad u baahato inaad musqul gasho: Ku kaadi weel aan lagu isticmaalin, sida bakeeri ama koob blaastik ka sameeysan. Kaddib kaadida ku shub weelka blaastikada ka sameeysan, kaasoo mudada ururinta lagu keydsho meel qaboow ah.



Markii (24 saacadood) ay ka soo wareegato, saacadii ururinta ay bilaabatay ku kaadi weelashi kaddib weelka ku shub. Kaddib jooji kaadi-ururinti. Kaddib ku keydi meel qaboow ilaa aad shaybaarka iska wareejiyo.



Weelka Ku dheji summadda sirta ah ama ku qor tobbanka lambar ee aqoonsiga iyo magacaaga.



Weelka blaastikada ka sameeysan iyo kaarka amar-bixinta [remiss] gacanta ka saar rugta daryeel-caafimaadeedka ama goobta shaybaarka lagula taliyay.
La kaalay kaarka aqoonsiga.